



Mawduuca: Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ee COVID-19 Macluumaad Dheeraad ah
Salaan,

E-mailkan ayaa lagugu ogaysiinayaa in arjigaaga la soo gudbiyay oo uu dib u eegis sugayo.

Baahida loo qabo oo sarraysa darteed, howsha arjiyada waa la daahiyay oo waxayna qaadanaysaa wakhti ka dheer intii la filayay in maamulahaagu kugula soo xiriiro oo uu dib ugu eego arjigaaga. Dhammaan arjiyada waxaa la sii wadayaa in loo borosiisgareeyo sida ay usoo kala horreeyeen. Waad ku mahadsantahay dulqaadkaaga.

Inta aad sugayso, [fadlan gal akoonkaaga](#) si aad u hubiso inaad soo dirtay kiradii wakhtigii la bixin lahaa la dhaafay ee ugu dambaysay, biilasha deynta guryaha, biilasha adeegyada (korontada-gaaska), iwm. Tani waxay noqon kartaa sawir ahaan, PDF ama dukumenti kale oo ah biilka lala daahay laftiisa ee aad caawimada u raadinayso. Macluumaadkan waxaa loogu baahan yahay in lagu socodsiiyo codsiga gargaar. **Kaliya kharashaadkii xilligii la bixin lahaa lasoo dhaafay ee ku taariikhaysan inta u dhaxaysa Maarso 1, 2020 iyo Diseembar 7, 2020 ayaa xaq u leh.** Kharashaadka dheeraadka ah ee kugu baxay wixii ka dambeeyay Disember 7 laguma dari karo codsiga. Waxaad sidoo kale eegi kartaa maamulaha barnaamijkaaga loo doortay iyo xaalada arjigaagu marayo akoonkaaga.

[Halkan guji si aad macluumaad uga hesho HousingLink](#) si ay kaaga caawiso inaad dhexmarto nidaamka arjiga ee ku jira khadka internetka.

Minnesota Housing (Guriyeynta Minnesota) ayaa ku guda jirta dejinta barnaamijka cusub ee COVID ee Caawinta Kirada ee Xaalada Degdega ah taas oo bixin doonta caawimada kiro toos ah si looga caawiyo shakhsiyaadka iyo qoysaska inay iska bixiyaan kirada, iyo sidoo kale caawimo loogu talagalay milkiilayaasha guryaha kirada ah iyo dadka guryaha leh si ay u bixiyaan biilashooda. Si aad u hesho akhbaartii ugu dambaysay ee ku saabsan barnaamijkan cusub ee la sugayo, [fadlan iska qor liistada eNews ee Kaalmada Degdegga ah ee COVID.](#)

Waad ku mahadsan tahay ka shaqaynta in aad ku soo dirto dukumiintiyadan arjigaaga khadka internetka iyo dulqaadkaagaba!